

Phoenix Futures

Ending dependency, transforming lives



Phoenix Futures waa mareegta adeegyada daweynta maandooriyaha iyo khamriga ee horseedka ka ah Boqortooyada Midowday (UK). Hay'addan samafalka ahi waxay bixisaa tiro balaadhan oo ah adeegyo si weyn waxtar u leh oo ay siiso beesha, xabsiyada iyo goobaha ah hoy dhaqancelin kuwaasoo sannad walba kumanaan qof ka gargaara inay isbeddel ku sameeyaan noloshooda.

Waxa aanu ka hawlgalnaa

- Goobo ah hoy dhaqancelin
- Goobo ah hoy dhaqancelin qoys
- Goob ah hoy dhaqancelin oo ah haweenka kaliya
- Adeegyo maalin oo qaabeysan
- Adeegyo xabsi
- Adeegyo beeleed
- Yareynta waxyeelada
- Adeegyo khamri
- Daweyn joogteyn ah
- Barnaamij ah farsamooyin iyo waxbarasho

Ma ka walwalsan tahay in adiga ama qof aad jeceshahay uu leeyahay dhibaato ah khamri ama maandooriye?

Kuwani waxay ka mid yihiin calaamadaha dhibaato ah khamri:

- Qofku oo si joogto ah oo u sakhraama
- Qofka oo aan khamri cabista joojin karin marka uu bilaabo
- Qofka oo u baahda inuu cabo khamri dheeraad ah si uu u gaadho isla saameyntii hore oo kale
- Qofka oo uu ka lumo xiisaha waxyaabaha u ahaan jiran maararow iyada oo sababtu tahay cabis khamri
- Qofka oo kaligii khamri caba
- Qofka oo cudur-daar u sameysta cabista khamriga
- Qofka oo wixii dadku ka filayay ka soo bixi waaya sababta oo ah cabista khamriga
- Qofka oo khamri ka soo uro maalintii
- Qofka oo dareema inuu khalad sameynayo marka uu khamri cabo
- Qofka oo gariira ama jareeraya subixii

Kuwani waxay ka mid yihiin calaamadaha dhibaato ah maandooriye:

- Rabista cuntada oo qofka ka lunta
- Qofka oo si aan caadi ahayn hurdo u hayso ama aan awoodin inuu seexdo habeenkii
- Dhaqan ah wakhtiyo uu qofku si badan u hadlo
- Qofka oo si aan caadi ahayn u cadho fudud, u xagxagasho jecel ama xiitaa dagaalamaya
- Niyadda qofka oo isbeddelo ku dhacayaan, iyada oo qofkii ahaa mid faraxsan oo niyadsan uu isu beddelayo qof murugeysan oo wareersan iyada oo aanay jirin sabab cad
- Qofka oo been sheega ama qarsada wax uu sameynayo
- Qofka oo beddela nooca dadka uu la saaxiibi jiray
- Qofka oo uu ka lumo xiisaha uu u qabi jiray maararowga iyo isboortiga
- Lacag ama alaab qiime leh oo laga waayo guriga
- Qofka oo gala dhibaato isu keenaysa boliiska oo ka imanaysa dhaqan ah edeb-daro iyo been-sheegid
- Baro, nabaro iyo calaamado aan caadi ahayn oo ku yaala jidhka, cududaha ama agagaarka afka iyo sanko
- Baro wasakh ah iyo ur kiimiko oo dharka iyo jidhka ah
- Hadalka qofka oo aan saafi ahayn, lumis xusuus iyo dawakhsanaan

Wac 0845 600 7227 si aad maanta sariir uga qabsatid goobahayaga ah hoy dhaqancelin ama iimayl u soo dir intake@phoenix-futures.org.uk si aad u qabanqabisid wada-hadal telefonka ah oo aad la yeelatid xubin ka tirsan kooxda Qorista iyo turjubaan ku hadla afkaaga.

Faahfaahinta la xidhiidhista Xafiiska Dhexe ee Phoenix Futures:

Phoenix Futures
3rd Floor, ASRA House
1 Long Lane
London
SE1 4PG

Tel: 020 7234 9740
Faakis: 020 7234 9770
Iimayl: info@phoenix-futures.org.uk